




Dugsiyada dadweynaha ee NSW – Horseedka Wadada

Time to start school

Family guide to starting Kindergarten

# Waqtigii dugsiiga la bilaabi lahaa

Buug-tilmaamaha Qoyska ee bilaabidda Kindergarten



NEW SOUTH WALES  
DEPARTMENT  
OF EDUCATION  
AND TRAINING





## Ku soo-dhawow dugsiga

### Waqtigii dugsiga la bilaabi lahaa

## Waxaad ka heli doontid gudahaha

Bilowga hagaagsan ee dugsiga	2
Wax-barashada ilmahaaga	6
Nolosha dugsiga	8
Tiknoolijiyada dugsiga	11
U-diyaargarowga hubinta dugsiga	12
<i>Waalidiinta Dugsiga</i>	14
<i>Galka maalmaha dugsiga</i>	15
Fasalka Kindergarten	16
Daryeelka ardayda	18
Itijaaha kooxeed	
– ilmahaaga, adiga iyo dugsiga	20
Maalmaha dugsiga oo caafimaadka leh	22
Macluumaadka Waxtarka leh	26



## Bilowga hagaagsan ee dugsiiga

Ku-diyaargarowga guriga ka hor intaan dugsiiga bilaaban waxay ka caawinaysaa adiga iyo ilmahaaga inaad kalsooni dareentaan iyo xiiso ku saabsan bilaabidda dugsiiga.

## U-diyaarinta ilmahaaga dugsiiga

Waa la joogaa waqtigii – ilmahaagu wuxuu bilaabayaa maalinta kowaad ee waayo-aragnimo cusub oo xiiso badan. Waxaad la yaabi kartaa bal halka aad wax ka bilowdo si aad ilmahaaga u diyaariso.

Waxaan qirsanahay inay u tahay tallaabo weyn qof kasta. Samaynta xiriirka habboon oo aan kula yeelano si aad u caawiso waxbarashada ilmahaaga waa wax noo muhiim ah. Kooxdayada oo ah macalimiin si heer sare ah u tababaran iyo shaqaalaha taageeraya waxay halkan u joogaan si ay ilmahaaga u siiyaan bilowga suurtagalka ah ee ugu fiican.

Xiriirkaaga kowaad ee dugsiiga waxaa laga yaabaa inuu yahay shaqaalaha maamulka dugsiiga. Waa dad wejijo furan oo xafiiska dugsiiga jooga. Waxay kaa caawiyaan ayagoo ku siinaya timaamo ku saabsan macluumaadka guud oo aad u baahan tahay. Waxay kaloo kuu sameeyaan ballamo aad la yeelato maamulaha, macalimiinta ama shaqaalaha kale ee dugsiiga, haddii aad u baahato inaad la hadasho mid ayaga ka mid ah.



## Iska diyaarinta guriga

Waxaa jira dhowr waxyaalood oo la habeeyo, miisaaniyad loogu talagaloo ama la qorsheeyo ka hor intaan dugsiiga bilaaban.

## Miisaaniyadda

Bilaabidda dugsiiga waxaa ku jira kharashyo cusub sida gadashada yunifoomka iyo kabaha dugsiiga sidaa darteed waxaa fiican in hore miisaaniyad loogu sii talagaloo waxyaalahaas. Haddii aad u baahan tahay daryeelka ilmahaaga saacadaha dugsiiga ka dib, kharashyadaasna ayaguna waxay u baahan yihiin in hore loogu talagaloo.

## Yunifoomka

Dugsiiga ilmahaaga ayaa kuu sheegaya yunifoomka dugsiiga iyo halka laga gadan karo. Koofiyadaha waxay ka mid yihiin yunifoomka dugsiiga si qorraxda laysaga ilaaliyo. Waxaa jira yunifoomka waqtiga kulaylaha, qabowga iyo kan cayaaraha. Dugsiiga ayaa kuu sheegaya dukaamada haya yunifoomka ama waxyaalaha laga sameeyo.

Si kharashyada loo yareeyo, dugsiyo badan ayaa qabta bandhig dhareed halkaas oo lagu sadaqeeyo waxyaalaha yunifoomka ah kadib marka carruurtii lahayd ka weynaato.

Haddii aadan hore dugsiiga ugu sii qorin ilmahaaga, fadlan tag dugsiiga si aad ugu qorto. Haddii ilmahaagu qabo baahiyo gaar ah ama wax aleerjiko ah waxaa muhiim ah in maamulaha loo sheego.

### Deeqaha dhaqaaleed

Dugsiyada ayaa ku weydiinaya deeqo iskaa ah si loo horumariyo barnaamijiyada waxbarashada ama kuwa cayaareed. Waxaa lagu weydiin doonaa inaad lacag ku bixiso dibad-baxyada sannadka oo dhan ah si loo horumariyo waxbarashada fasaleed ee ilmahaaga markaasna haddii uu ilmahaagii ka qaybgalo nashaadyadaas dheeraadka ah sida cayaaraha ama kooxda, waxaa lagu weydiin karaa inaad lacag ku bixiso waxyaalaha la soo kireeyo ama gaadiidka lagu tago munaasabadaha.

### Caawimaad dhaqaale

Haddii ay dhibaato kaa haysato kharashyada dugsi-dhigashada, fadlan ballan la sameeyso maamulaha dugsiya si aad ugala hadasho xaaladdaada. Barnaamijka Caawimidda Ardayga (Student Assistance Scheme) ayaa laga yaabaa inuu ku caawiyo e'.

### Canshuur-celinta Waxbarashada

Kharashyada waxbarasho qaarkood ayaa leh canshuur-celin. Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg:

[www.ato.gov.au](http://www.ato.gov.au)



### Aadidda iyo ka-soo-noqshada dugsiya

Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu xaq u yeesho kabidda kharashka safarka oo laga bixiyo Barnaamijka Gaadiidka Ardayga Dugsiya (School Student Transport Scheme). Barnaamijkan wuxuu siiyaa kabidda kharashka safarka tareenka, basaska, feeriyada adeegyada basaka meelaha fog. Meelaha aan lahayn gaadiid dadweyne, kabiid ayaa loo heli karaa gaadiidka gaarka oo lagu tago ama looga yimaado dugsiya.

**Taleefanka: 1800 227 774 ama (02) 9891 8900**  
[www.transport.nsw.gov.au](http://www.transport.nsw.gov.au)

### Daryeelka Saacadaha dugsiya ka baxsan

Adeegyada daryeela carruurta saacadaha dugsiya ka baxsan (Outside of School Hours - OOSH) waxaa badanaa qabta dugsiyada ama meelaha u dhow dugsiya. Dugsiyaaga ayaa ku siin kara macluumaad ku saabsan adeegyada degaankaaga ka jira. Adeegyadan waxay ka qaadaan ujrado waxaana laga yaabaa inay xaq u yeeshaan Manfaca Daryeelka Ilmaha (Child Care Benefit) si looga caawiyo ujradyinkaas.

**Taleefanka: Centrelink 136 150**  
[www.centrelink.gov.au](http://www.centrelink.gov.au)



## Ku dul-qor magaca ilmahaaga wax kasta

Waxaad samayn kartaa:

- adeegso maarkarka lagu dulqori karo dharka, koofiyadaha iyo kabaha, ama ku tol ama ku dheji waxa shakhsi loo leeyahay
- hubi inaan wixii lagu dul-qoray aysan dhaqmin
- habeen kasta ka fiiri boorsada ilmahaaga
- dugsiyada oo dhan waxay leeyihiin meel lagu ururiyo waxyaalaha luma, sidaa darteed xafiiska weydii haddii ay wax idin ka lumaan.



## Wax-barashada ilmahaaga

Ma jiraan xirfado gaar ah oo ilmahaagu u baahan yahay ka hor intuusan bilaabin Kindergarten – lagama filayo inay yaqaaniin sida wax loo akhriyo ama loo qoro. Waxyaalaha ugu weyn waa in adiga iyo ilmahaagu aad kalsooni ku qabtaan bilaabidda dugsiga.

## Nashaadyada lala sameeyo ilmahaaga ka hor intuusan bilaabin dugsiga

Nashaadyadan waa uun talo-bixino waxa lala sameeyo carruurta ka hor intaysan bilaabin dugsiga sida dugsigu ugu fududaado.

### Xirfadaha Luqadeed

- wada heesa
- isku sheega kaftamo iyo ritmooyinka
- sii ilmahaaga tilmaamo fudud, tusaale, sida loo xirxirto boorsada
- adeegso buugga lagu raaxaysto, tusaale daawashada sawirada buuggagta
- aqoonsiga sawirada ku yaal buuggagta, wargeysyada, ama taleefishinka ama intarneedka
- ku dhiirigeli ilmahaaga inuu ka qaybgalo sheekaysiga.

### Xirfadaha qoraalka

- sii ilmahaaga laabis, maarkaro, carayoon, burushka wax lagu sawiro iyo qoryaha ciidda lagu asteeyo, ama lagu qoro
- qor tirooyinka iyo xarfaha
- ilmahaaga ku dhiirigeli inuu isticmaalo xarfaha waaweyn si ay qoridda magacooda u bilaabaan tusaale Jack.

### Xirfadaha xisaabeed

- ilmahaaga ku dhiirigeli si uu u aqoonsado tirooyinka asagoo adeegsanaya erayada sida badan, wax fara badan, ka badan, ka yar
- ku caawi ilmahaaga inuu helo waxyaalaha kooxda oo kala duwan, sida kala duwanaanta qaababka
- kala hadal waxyaalaha isku lidka ah – kor iyo hoos, hoos iyo sare, hore iyo gadaal, maalin iyo habeen.

### Xirfadaha shakhsiyadeed/bulshadeed

- u habee waqtiyada uu ilmahaagu la soo cayaaro carruurta kale si ay u bartaan sid wax loo wadaago ama loo tookaysto
- ku dhiirigeli ilmahaaga inuu is-habeeyo cayaarta ka dib
- ku caawi ilmahaaga inuu barto inuu sheegi karo magaciisa oo dhan iyo cinwaankooda
- ka dhig ilmahaaga mid yaqaan sharciyada iyo sababaha loo sameeyey.

### Xirfadaha jidheed

- bar sida loo isticmaalo maqaska
- sii fursadaha uu ku cayaaro baloog dhisidda iyo xujoyinka
- la cayaar dheelaha bootimaalaysiga iyo xarig ka boodidda.

## Sii wadidda cayaarta

Cayaartu waxay ka mid tahay baahiyaha ugu muhiimsan oo carruurta qabaan ma isbadasho marka ay carruurta gasho Kindergarten. Cayaartu waxay horumarisaa dhammaan dhinacyada koritaanka caafimaadkooda.

Carruurta way cayaaraan sababtoo ah waa wax fun ah hase ahaatee isla markii ay cayaarayaan waxbay baranayaan. Markii carruurta cayaarto waxay adeegsanayaan jidhkooda, fakarkooda, waxayna baranayaan sida dadka loola xiriiro ama loo kaashado. Waxay baranayaan sida waxyaaluhu u shaqeeyaan iyo sida loo maareeyo dareennada. Fadlan u ogolow waqti aan go'nayn ka dib watiga ilmahaagu dugsiga ka soo baxo si uu u nasto oo uu u cayaaro.



## Nolosha dugsiga

Dugsi kasta wuxuu leeyahay waqti uu bilaabmo ama dhammaado, hase ahaatee guud ahaan dugsigu wuxuu bilaabmaa 9 am wuxuuna dhammaadaa ilaa 3 pm, Isniinta ilaa jumcaha. Ardaydu waxay qaataan waqti yar oo biririf ah iyo waqti ay qadada cunaan oo cayaaraan.

Dugsigu wuxuu ku bilowdaa ama ku dhammaadaa daabuur halkaas oo ardaydu isugu timaaddo si ay wax uga maqlaan maamulaha, macalimiinta ama horjoogayaasha ardayda marka ay wax ogaysiinayaan.

## Dugsigu waa khasab

Sharcigu wuxuu sheegayaa in dhammaan carruurta gaartay da'da dugsiga oo khasabka ah inay tagaan dugsi. Markii ay carruurta gafto dugsiga waxay gafayaan macluumaad muhiim ah, barashada howl-maalmeedkooduna wuu kala go'aa waxaana ka luma isku kalsoonaanta. Waxaa kaloo ka luma yeelashada saaxiibtinimada. Waxyaalahaas oo dhan waxay saamayn karaan itijaahooda ku aadan dugsiga iyo wax-qabadkooda.

### Haddii ilmahaagu soo daaho ama maqnaado

Haddii ilmahaagu soo daaho waa inaad magacooda ka saxiixdo xafiiska dugsiga, taasina waxay la mid tahay haddii aad mar hore ilmahaaga ka wadayso dugsiga sabab kastoo jirta.


Haddii uu ilmahaagu ka maqnaado dugsiga waxaa lagaa doonayaa inaad kabixiso sharaxaad sababta uu ku maqnaa. Badanaa taas waxaa lagu sameeyaa soo qoridda farriin yar oo lagu sheegayo sababta ay dugsiga uga maqnaayeen markaasna ilmahaagu wuxuu farriinta u dhiibayaa macalinka marka uu dugsiga ku noqdo. Waxaa kaloo la samayn karaa in taleefan dugsiga lagu soo waco.

### Soo-qaadidda carruurta marka maalintu dhammaato

Maalin kasta marka dugsigu dhammaado, fasalka ilmahaagu waxay ku kulmayaan meel joogto ah. Macalinka ilmahu wuxuu la joogayaa carruurta. Waa inaad hubisaa in ilmahaaga iyo macalinkuba inay yaqaaniin cidda soo wadaya galabtaas. Carruurta way caroodaan haddii adiga ama ciddii kale oo wadaysey hadday ka soo daahaan. Ka hubi macalinkooda waqtiga ugu fiican oo galabtaas la iman karo.

### Sii-wadidda nidaam raaca

Carruurta Kindergarten way daalaan habeenkii sababtoo ah waxay sameeyaan waxyaalo badan oo ku cusub una xiiso badan. Sababtaas darteed waxaa caawin karta haddii aad si joogto ah u sii waddo howlaha joogtada sida waqtiga qubayska, cunta-cunidda iyo waqtiga akhriska. Seexasho fiican oo ay helaan habeenkii waa muhiim.



## Qoridda farriimaha

Haddii uu ilmahaagu ka baaqdo dugsiga, waxaad macluumaadka soo socda ku qori kartaafarriin:

- ku qor magaca iyo fasalka ilmahaaga
- ku qor taariikhda iyo tirada maalmaha uu maqnaa
- sheeg sababta uu ilmahaagu u maqnaa
- ku qor wixii macluumaad kale ah oo loo baahdo.

Haddii uu ilmahaagu maqnaanayo wax ka badan saddex maalmood, fadlan u sheeg xafiiska dugsiga si uu ula socdo. Welina waxaad u sii baahan doontaa inaad soo qorto farriinta markii ilmahaagu dugsiga ku soo noqdo.

Qaabka farriimaha iyo macluumaadka lagu turjumey 34 luqadood ka eeg

### School Attendance

[https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index\\_s.htm](https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_s.htm)

### **Si ammaan ah u-aadidda iyo uga-soo-noqoshada dugsiga**

Fadlan xusuuso sidaad uga gudbi lahayd waddooyinka adigoo gacanta haya ilmahaaga. Waddooyinka u dhow dugsiyada waa mashquul subaxdii iyo galbihii. Fadlan ha istaagin ama ha dhigin baabuurkaaga meelahaas ama meel u dhow meesha dadku ku lugeeyaan iskana eeg dhammaan calaamadaha amaanka iyo kuwa aan la joogsan karin.

[www.rta.nsw.gov.au](http://www.rta.nsw.gov.au)

### **Ardayda hibada iyo kartida leh**

Carruurta hibada iyo kartida leh waxay leeyihiin karti ka sarraysa midda caadiga ah ama meelo badan oo xagga awoodda caqliga, bulshada ama jidheed ah. Fursado ayaa ka jira dugsiyada dadweynaha ee NSW oo loogu talagalay carruurta hibada iyo kartida leh. Fadlan la xiriir dugsigaaga si aad maamulaha ugala hadasho barnaamijyada jira.

[www.curriculumsupport.education.nsw.gov.au/policies/gats](http://www.curriculumsupport.education.nsw.gov.au/policies/gats)

### **Ardayda leh baahiyo gaar ah**

Haddii ilmahaagu qabo iin ama baahiyo gaar ah, fadlan u sheeg maamulaha sida ugu dhakhsaha badan. Department of Education and Training waxay bixisaa adeegyo takhasusle oo ballaaran si looga taageero ardayda ay hayso iintu.

[www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/programs/disability.php](http://www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/programs/disability.php)

Ardayda ay hayaan dhibaatooyinka waxbarasho, sida ardayda qabta ku-adkaanta waxbarashada oo la taaban karo, ama iimo caqliyeed meel-dhexaad ah iyo nidaam-darro luqadeed, waxaa taageera Barnaamijka Caawimaada waxbarashada oo ka jira dugsigooda.

[www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/programs/lrngdifficulty.php](http://www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/programs/lrngdifficulty.php)



### **Warbixinnada**

Waxaad haysaa ugu yaraan laba warbixinood oo qoraal ah oo ku saabsan horumarka uu samaynayo ilmahaagu sannad kasta, badanaa ku aadan dhammaadka teeramka 2aad iyo kan 4aad. Wareysiyada waalidka iyo macalimiinta ayaa kuu ogolaanaysa inaad kala hadasho horumarka ilmahaaga macalinka ayadoo qaabilaad ah, hase ahaatee haddii aad qabto wax dareen ah sannadkaas, ballan u samayso macalinka si aad ugala hadasho arimahaas.

Dugsiga waad tegi kartaa, taleefan ama email baad u diri kartaa si aad ugala hadasho wax kasta oo aad qabto. Turjumaano ayaa jira haddii aad u baahato.



## **Tiknoolijiyada dugsiga**

Noqo mid si joogta ah loola socodsiiyo tiknoolijiyadda ay carruurtaadu ku isticmaalaan guriga, dugsiga iyo meelaha kale.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg:

[www.schools.nsw.edu.au/click](http://www.schools.nsw.edu.au/click)

# U-diyaargarowga hubinta dugsiga

TIGAREE SHAQO KASTA KA DIB MARKA LA SAMEEYO.  
(SHAQOYINKA OO DHAN KUMA KHUSEYAAAN).

## Sannadka ka-horreeya marka ilmahaagu bilaabay dugsiga

- Imow maalinta macluumaad-siinta ama kala guurka dugsiyada.
- Marka waqtiga tallaalka la joogo, codso in la baaro maqalka iyo aragga ilmaha.
- Haddii ilmahaagu qabo aleerjiko, jirro caafimaad ama baahiyo gaar ah, dugsiga intii suurtagal ah dugsiga hore ugu sii sheeg waxaadna ballan u samaysataa aad ku aragto maamulaha.
- Buuxi codsiga baaska baabuur raaca haddii taasi ku khuseyso (ka eeg bogga 5aad).
- Habayso cidda ilaalinyasa ilmahaaga ka hor iyo ka dib dugsiga. Buuxi codsiga adeegga OOSH haddii loo baahdo (ka eeg bogga 5aad).

## Waxyaalaha qaarkood aad u baahan tahay inaad u soo gadato dugsiga

- Yunifoomka dugsiga (kulaylaha, qaboobaha, cayaaraha).
- Koofida qorraxda (badanaa waa ka qayb yunifoomka dugsiga).
- Kabaha dugsiga iyo kuwa lagu ordo (gado Velcro haddii aysan xiran karin xargaha).
- Back pack (waxaa laga helaa dugsiga).
- Bokiska qadada (ilmahaagu ha doorto midka ay furi karaan).
- Dhalada biyaha.
- Jaakadda roobka.
- Shaarka rinjiga (shaatiga-T duugga ah ayaa qaban kara).
- Baagga maktabadda.

## Taariikhaha teeramka

Sannad-dugsiiyeedka wuxuu ka kooban yahay afar teeram taas oo laba samistar ka kooban. Ardayda Kindergarten waxay badanaa bilaabaan maalin ka dib carruurta kale ee dugsiga iyo ardayda gaar ahaaneed ee dhigata Kindergarten badanaa waxay bilaabaan waqtiyo gaar ah sidaa darteed macalinku wuxuu waqti gelinayaa arday kasta. Dugsigaaga ayaa kuu sheegi doona.

Waxaad ka eegi kartaa taariikhaha runta ah ee teeram kasta ee cinwaanka website-ka soo socda

<http://www.schools.nsw.edu.au/calendar/>

\* Taariikhaha dugsigu bilowdo waxaa laga yaabaa inay noqdaan taariikho dambe dugsiyada qaarkood oo ku yaal Galbeedka NSW. Ka hubso dugsigaaga.

\*\* Ka hubso dugsigaaga wixii isbaddalo ah.

## Sannadka uu ilmahaagu bilaabay dugsiga

- Janaayo – Waxaa laga yaabaa inaad waqti geliso maalin kasta oo ilmahaagu ku tababarto waxyaalaha uu ilmahaagu sameeyo markuu dugsiga bilaabo tuusaale sawiridda sawirada.
- Ku dul qor magaca ilmahaaga wax kasta!
- Hubi inaad haysato lamabarka taleefanka dugsiga.
- Bar ilmahaaga isticmaalka meelaha lagu kaadsho hadduusan hore u aqoon.

## Habeenka ka horreeya maalinta kowaad ee dugsiga

- Diyaari labiska, kabaha iyo sigisyada ilmahaaga.
- Waxaa laga yaabaa inaad samayso qadadaberrri ilmahaaga caawa oo aad geliso firijjka.
- Ku caawi ilmahaaga inuu xirxirto boorsada dugsiga.
- Ugu rid mantate dheeraad ah, sigisyo iyo dharka badalashada baag balaastig ah. Una sheeg ilmahaaga inay waxyaalahaas ugu jiraan backpack hadday dhacdo inay shilal ku galaan musqusha dugsiga.

## Maalinta kowaad

- Noqo mid ku faraxsan maalinta kowaad ilmahaaga.
- U ogoalow ilmahaaga inuu asagu labisto intii suurtagal ahaba.
- Timaha dhaadheer gadaal ugu xir ama ku xir balaytka timaha.
- Kareemka qorraxda marmari ilmahaaga subax kasta. Waxay u baahan yihiin inay gashadaan koofidooda dugsiga marka ay ka baxaan fasalka dhexdiisa.
- Sawiro iska qaada!

## Toddobaadka ugu horreeya dugsiga

- Dugsiga ayaa kuu sheegaya marka aad la soo xirxirayso waxyaalaha loogu talagalay nashaadyada sida cayaaraha, farshaxanka ama maktabadda.
- Carruurto badanaa way daalan yihiin toddobaadyada ugu horreeya dugsiga. Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay seexasho badan.
- Sii ilmahaaga quraac caafimaad leh si ay maalinta u shaqeeyaan.
- Hubi in ilmahaagu yaqaan cidda soo qaadaysa maalin kasta.
- Ka fiiri boorsada ilmahaaga habeen kasta wax fariin dugsiga ah iyo waxqado la soo hanbeeyey ah.
- Isku day inaad hubintaas ka dhigato joogto.
- Guriga ku bilow howl-maalimeedka akhriska.
- Kala hadal macalinka wixii caawimaad fasal ah, haddii aad awoodo.
- Kula kaftan ilmahaaga wax ku saabsan maalintaas dugsiga.
- Waxaa muhiim ah in ilmahaagu weli waqti u haysto uu ku nasto, dibadda ku soo cayaaro iyo inuu sameeyo waxyaalaha ay jecel yihiin marka ay dugsiga bilaabaan.



## Waalidiinta Dugsiga

Wargeyska intarneedka ah (ezine) oo loogu talagalay inuu hooyooyinka iyo aabayaasha ka caawiyo inay helaan macluumaadka ku saabsan howlaha dugsiga.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg:

[www.schools.nsw.edu.au/ezine](http://www.schools.nsw.edu.au/ezine)



## Galka maalmaha dugsiga

Wuxuu kugu caawinayaa inay habeysato howlaha dugsiga iyo kuwa guriga. Meel macluumaad dugsiyada oo diyaar ah laga helo waa.

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan ka eeg:

[www.schools.nsw.edu.au/schooldays](http://www.schools.nsw.edu.au/schooldays)



## Fasalka Kindergarten

Fasallada Kindergarten waa meelo farxad iyo xiiso leh. Ilmahu waxay saaxiibada la sameeyaan xujooyin lagu sameeyo dhulka, ku cayaaraan gurya-caruureedka , dhagaystaan macalinkooda oo akhriya buug ama ku fadhiya miiska si uu wax u qoro ama u sawiro. Waxay wax ka baranayaan lamabarada, qaababaka, qaabka ay wax u socdaan iyo sayniska, u heesaan, soo booqdaan maktabadda, adeegsadaan kombiyuutarada ayna ka qaybgalaan nashaadyada kale.

## Waxa uu ilmahaagu ka baran doono dugsiya

Badanaa Kindergarten waxay waqtigeeda gelisaa kor-u-qaadida xirfadaha akhris-qoraalka iyo xisaabta. Waxaa jira lix maaddo oo loo yaqaan Maaddooyinka Waxbarashada oo Asaasiga ah oo lagu barto dhammaan dugsiyada hoose.

Kuwaasina waxay yihiin:

- Ingiriisiga (English)
- Xisaabta (Mathematics)
- Sayniska iyo Tiknoloojiga (Science and Technology)
- Farshaxanka Hal-abuurka (Creative Arts)
- Bulshada Insaanka iyo Beya'deeda (Human Society and its Environment)
- Horumarka Qof ahaaneed, Caafimaadka iyo Waxbarashada Jidhiska (Personal Development, Health and Physical Education)

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxaa uu ilmahaagu baranayo waxaad ka heli kartaa website Board of Studies.

[www.boardofstudies.nsw.edu.au/parents](http://www.boardofstudies.nsw.edu.au/parents)

### Tiknoloojiyada isgaarsiinta

NSW Department of Education and Training waxay ilmahaaga siisaa akoonka intarneedka iyo email si ay kor-ugu-qaadaan fursadhooda waxbarasho ee beya'd ammaan ah. Adeegsiga tiknoloojiyadda isgaarsiinta ayaa lagu daray waxbarashada fasal kasta ka socota.

### Best Start Kindergarten Assessment

Carruurto waxay la galaan khindhaha Kindergarten xirfado iyo waayo-aragnimo kala duwan. Best Start Kindergarten Assessment waa qalab ku caawiya macalimiinta inay helaan xirfadda ilmo kasta markaasna ku habeeyaan waxbaridooda baahiyaha gaarka ah ee shakhsi. Macalimiintu waxay la fariisan doonaan ilmahaaga bilowga hore ee dugsiya si ay u qiimeeyaan xirfadaha bilowga ah ee akhriska iyo qoraal iyo xisaabta si ay u sameeyaan barnaamij waxbarid ku habboon looguna talagalay ilmahaaga. Wixii macluumaad la turjumey ah ka eeg

*Best Start Kindergarten Assessment*

[https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index\\_b.htm](https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_b.htm)

### "maxaad ka soo qabatay dugsiya maanta?"

Haddii uu ilmahaagu ka jawaabo su'aashan asagoo oranaya "Waxba", isku day inaad weydiiso su'aal ka duwan oo ah "Maxay yihiin erayada aad maanta soo baratay?" "Kumaad la cayaartay waqtigii qadada?", "Maxaad ugu jeclayd dugsiya maantay?"





## Daryeelka ardayda

Waxaa muhiim ah in adiga iyo ilmahaagaba inaad taqaanaan in markasta ay jirto cid dugsiga idiin ka caawinaysa. Dugsiyadu waxay kaloo leeyihiin barnaamijyo lagu guulaystey oo taageera ardayda kana dhiga kuwo nabdoon.

## Ka dhigidda ilmaha kuwa ammaan ah oo faraxsan

Dugsigaaga ayaa kuu sheegi doona marka garoonka dugsiga la kormeero, hababka dugsi-ka-qaadidda iyo siyaabaha kale oo ay u hubiyaan in carruurta laga warqabo waqtiyo kasta.

### Macalimiinta

Macalimiinta dugsiyada dadweynaha ee NSW waa kuwo jaamacado ka soo baxay si xirfadaysana loo tababaray. Aad bay xasaasi ugu yihiin baahiyaha carruurta yaryar waxayna halkaas u joogaan inay caawiyaan oo tilmaamaan. Macalinka ilmahaaga ayaa kuu sheegi doona habka ugu fiican aad kula socon karto kuna heli karto horumarka waxbarasho ee ilmahaaga. La socodsii macalinka ilmahaaga inuu og yahay wixii isbaddalo ah oo ku dhaca nolasha ilmahaaga taas oo saamaysa shaqadooda ama jeclaantooda dugsiga.

### La-taliyayaasha Dugsiga

La-taliyayaasha dugsiyadu waa macalimiin waayo-arag ah kuwaas oo ah cilmi-nafsi yaqaano tababaran oo ku haysta shahaadooyinka jaamacadda ee labaad xagga la-talinta dugsiyada. Waxay ka caawin karaan ardayda kuwaas oo ka qaba dhibaatooyin dugsiga iyo gurigaba. Waxay kaloo qoysaska ka caawin karaan siday u heli lahaayeen adeegyada ka baxsan dugsiga hadday u baahdaan. Waxaad badanaa u baahan tahay inaad ballan la samaysato la-taliyaha dugsiga adigoo taleefan u dira dugsiga.

### Beya'd aan xoogsheegasho lahayn

Dhammaan dugsiyada dadweynahu waxay si fiican uga hortagaan xoogsheegashada ayagoo leh barnaamijyada sida taageerada facaha kuwaas oo dhiirrigeliya akhlaaqda habboon, dhisa qabka nafta iyo ixtiraamka dadka kale. Dugsiyadu waxay kaloo leeyihiin qorsheyaal ay wax uga qabtaan xoogsheegashada ama kadeedka, shaqaalaha dugsiguna way u tababaran yihiin inay wax ka qabtaan xaaladahan. Waxaad xafiiska dugsiga ka heli kartaa koobiga qorshaha ka-hortagga xoogsheegashada ee dugsigaaga.

### Daryeel dheeraad ah

Shaqaalaha Dugsiyada dadweynahu waxay siiyaan taageero-dheeri halkii hadba looga baahdo.

Meelahaasna waxaa ka mid ah:

- ka-taageeridda macalimiinta ardayda ay hayaan dhibaatooyin waxbarasho
- Ingiriisigu yahay luqadda labaad (English as a second language - ESL)
- macluumaadka bulshada iyo saraakiisha xiriiriyayaasha
- saraakiisha waxbarashada Aborijiinka.



Haddii aad dareento isbaddelo waaweyn oo ku dhaca akhlaaqda ilmahaaga ama aad wax ka qabto ilmahaaga iyo dugsi-dhigashadiisa waxaad kala hadli kartaa macalinka ilmahaaga, la-taliyaha dugsiga ama maamulaha. Waxaa markasta fiican in mar hore layskula soo qaado wax kasta oo dareen ah intii suurtagal ahba.



## Itijaaha kooxeed – ilmahaaga, adiga iyo dugsiga

Carruurta waxay jecel yihiin inay arkaan waalidkooda iyo daryeelayaashooda oo dugsiga jooga, ama fasalka dhexdiisa ha caawinayaan, ama kaantiinka ama siyaabo kale howga soo qaybgaleene. Cilmi-baaristu waxay muujinaysaa in ardaydu si fiican dugsiga wax uga qabtaan markii waalidkooda iyo daryeelayaashooda ka qaataan door fiican howlaha dugsiga. Tabarucaadkaaga waa la soo dhaweynayaa.

## Ka-qaybgal hawlaha dugsiga ilmahaaga

Siyaabaha aad uga qaybgali karto:

- ka caawi fasalka dhexdiisa
- dhagayso marka carruurta wax akhriyayaan
- carruurta ku caawi kombiyuutarada
- ku caawi dibad-baxyada dugsiga
- ka shaqee kaantiinka
- hogaami kooxda cayaaraha.

### Ka mid noqo guddiga

- Haya'dda Waalidiinta iyo Muwaadiniinta (The Parents and Citizens' Association - P&C) oo dugsiga kasta ka jirta waxay ka qaybgalaan samaynta go'aannada ku saabsan dugsiga iyo sida ay lacagaha u kharash-garayso. Haddii aadan ka qaybgali karin kulannada, waxaad ka qaybgeli kartaa waxyaalaha ay ka wadaan dugsiga, sida munaasabada bulshadeed iyo kuwa lacag uruurinta.
- Guddiyada Dugsiyada (School Councils) waxay ka kooban yihiin waalidiinta, macalimiinta, maamulaha iyo wakiilada bulshada degaanka. Waxay kaalin muhiim ah ka qaataan hubinta in dhammaan bulshada dugsiga ka qaybgasho go'aamada muhiimka ah oo loo sameeyo dugsiga.
- Waxbarashada Aborijiinka iyo Kooxaha La-taliya (Aboriginal Education and Consultative Groups - AECG) waxay hubiyaan in bulshooyinku ay fikrad ka dhiibtan Waxbarashada Aborijiinka iyo arimaha la xiriira oo heer degaan ah.
- Haya'dda Waalidiinta Carruurta Go'doonsan (Isolated Children's Parents' Association) waxay ku dadaashaa kor-u-qaadidda fursadaha waxbarasho ee carruurta ku nool goobaha fogfog iyo kuwa miyiga.



## Is-habaynta

Waxaad ogaan doontaa markii uu ilmahaagu bilaabo dugsiga inay jirayaan farriimo fara badan oo guriga loo soo dirayo kana imaanaya dugsiga iyo sidoo kale wargeyska dugsiga oo joogtada ah. Runtii waa fikrad wanaagsan in lagu bilaabo gal lagu keediyo oo lagu habeeyo dhammaan wixii macluumaad ah oo dugsiga la xiriira, sida farriimaha, wargeysyada, warbixinada iyo shaqo-dugsiyada ilmahaaga.

Haddii aad heli karto gal, waxaad u samayn karta kala habeeyo adigoo adeegsada qalabka iyo xogaha laga heli karo:

[www.schools.nsw.edu.au/news/schooldays](http://www.schools.nsw.edu.au/news/schooldays)

Daabaco galka sare iyo kala-qaybiyaha qaybaha si aad u samayso gal cajiib ah. Waxaad soo qaadataa kalandar si uu kaaga caawiyo inaad haysato farriimaha ku saabsan ka qaybgalka dugsigaaga iyo ballamaha, samaysato meel aad ku xafidato faahfaahinta xiriirada dugsiga, iyo sidoo kale xaashiyaha macluumaadka iyo xogagaha si aad uga caawiso ilmahaaga shaqo-guriga.



## Maalmaha dugsiga oo caafimaadka leh

Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay cunto caafimaad leh si uu helo tamar iyo xoog-saaris intuu joogo dugsiga. Cuntada uu ilmahaagu u cuno quraacda waxay u qaban doontaa inuu ku sii adkaysto ilaa subaxdii inta la gaarayo biririfta waxayna u baahan yihiin cuntooyin caafimaad leh oo kala duwan waqtiyada biririfta iyo qadada si ay u adkaystaan intay maalinta dugsiga joogaan.

## Wax ku cunidda Dugsiga

Wax ku cunidda dugsiga waxay u noqonaysaa waayo-aragnimo ka duwan ilmahaaga marka loo eego wax ku cuniddii guriga ama xannaanada. Ma jiraan meelo cuntada lagu kululeeyo ama lagu qaboojiyo. Carruurta badanaa waxay ku dul fariistaan cawska ama kuraasta dhaadheer cuntada waxay ku qabsadaan dhabtooda. Waxay kaloo u baahan doonaan inay furi karaan wax kasta oo ay cuntadoodu ugu jirto ama ugu duuban tahay mana doonayaan inay waqti badan ku qaataan wax cunidda maaddaama ay gefayaan cayaarta.

### Nasteexooyinka si loo caawiyo ilmahaaga

- u soo xirxir cunto ay fududahay in la furo, ay fududahay in la cuno oo aan abuurayn wax isku daadin ah.
- magacooda ugu dul qor bokiskooda qadada, dhalada biyaha, iyo wixii kale oo weel ay wataan.
- ugu rid dhalada biyaha oo aad u qabow si ay cuntada uga dhigto mid qabow. Ku duub shukumaan si aysan u dillaacin.
- adeegso bokisyada qadada oo dahaaran ama baaggaga wax qaboojiya.
- iska ilaali wax ku duubidda balaastiga sababtoo ah carruurta way ku adag tahay inay iska fiiqaan.
- Ku xirxir tishuu ama warqad qudaarta dusheeda si aysan u fiiqmin.
- xusuusi ilmahaaga inay fara-dhaqdaan ka hor intaysan wax cuniniyo inay musqulaha galaan waqtiyada biririfta ama qadada.
- haddii aad qadadii samaysay habeenkii hore, ku kaydi firijika ilaa waqtiga dugsiga.
- ugu rid dhalada biyaha ilmahaaga maalin walba waxaadna xusuusisaa inay biyaha kaga shubtaan tuubada maalinta oo dhan.

### Talooyinka biririfta iyo qadada

- u-jarjar miraha (xoogaa liin ah dusha uga dhiiji tufaaxa, biiriska ama mooska si looga celiyo inay barown noqdaan) uguna rid bokiskooda.
- u-jarjar khudaarta sida daba-caseeyaha, celeryga iyo qajaarka uguna rid boorsada balaastiga ah. Meel kalena ugu shub maraq yar ama yogarka si ay daba-caseeyaha ugu dhuuqaan.
- u samee muufiinka wholemeal una qabooji. Maalin walba maafiinka ugu rid si ay u cunaan waqtiga biririfta ama guriga ugu hay si snack uga dhigtaan.
- oranji la qaboojiyey iyo cananaaska warwareegsan waa waxyaalaha la cuno waqti kulaylaha.
- isku day rootiyo kala duwan, sida rooliska, pita, wholegrain ama tortilla la duubay.
- haddii tamadhada la isticmaalo, xaleefyo ahaan u jarjar una dhexgeli sanwiijka si uusan u noqon wax dhoqosh ah.
- kari xoogaa casho dheeraad ah meelna u dhig qayb qadada maalinta kale. Biisooyinka guriga lagu sameeyo, khudaarta, qudaarta la dubey, saladhka nuudhalka ama soosejka ayaa la isticmaali karaa.

## Marka qadadu guriga ku soo noqoto

Waxba haka walwelin haddii uusan ilmahaagu cunin qadadii. Mararka qaarkood carruurta waxay ku mashquulsan yihiin la cayaaridda saaxiibadooda waqtiyada qadada waxaana laga yaabaa inaysan cunin qadadoodii.

Haddii ilmahaagu uu aad u gaajaysan yahay dugsiga ka dib waa inaad xusuusisaa bal inay soo cuneen qadadoodii. Habka cunto cunidda ilmahaaga ayadaa ayaa caadi iska noqon doonta ugu dambaynta.

## Injirta Madaxa

Waa u caadi carruurta dugsiga inay injirta madaxu gasho mararka qaarkood kumana xidhna xagga nadaafadda ama wasakhda. Injirta madaxu waxay ku faafi kartaa marka ilmahi isku dhow yihiin, hase ahaatee injirta madaxu uma keento wax waxyeello ah caafimaadka ilmaha.

### Sida looga ilaaliyo ilmahaaga inay injirta madaxu gasho:

- si joogto ah u eeg timaha ilmahaaga
- timaha dhaadheer gadaal ugu xidh.

### Haddii uu ilmahaagu injir madaxa ku leeyahay:

- timaha isku murugsan ku kala bixi shanlada, ka dibna maalin kasta timaha ugu shanlee conditioner adoo adeegsanaya shanlada ilkaha yaryar si aad uga takhalusto injirta madaxa iyo qindhicilkooda (nits) ilaa meesha laga dhameeyo qindhicilka
- sii wad inaad ilmahaaga dugsiga u dirto
- u sheeg dugsiga si kuwa kalena ugu sheegaan inay eegaan timaha ilmahooda, mana ahan in ilmahaaga la aqoonsado
- dugsiyadu waxay mararka qaarkood sameeyaan maalinta “qindhicil guridda” si degdeg looga takhaluso qindhicilka dugsiga dhexdiisa.

**Wixii macluumaad dheeraad ah:**  
[www.health.nsw.gov.au/publichealth/environment/headlice/](http://www.health.nsw.gov.au/publichealth/environment/headlice/)

**Wixii macluumaad ah ee La Turjumey ka eeg:**

*Head lice parent information sheet*  
[https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index\\_h.htm](https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_h.htm)



## Maxaa dhacaya haddii uu ilmahaagu xanuunsan yahay?

### Marka dugsiga la joogo

Haddii uu ilmahaagu xanuusan yahay ama lagu dhaawaco dugsiga, markaas dugsiga ayaa kula soo xiriiraya kuna weydiin doona daaweynta loo baahan yahay. Haddii uu ilmahaagu xoogaa xanuusan yahay waxaa la gaynayaa sariirta qolka xanuunka, oo badanaa u dhow xafiiska dugsiga, halkaas oo ay seexan karaan lagulana soconayo. Waxaa lagu sheegayaa inaad u timaaddo oo aad wadato ilmahaaga haddii ay aad uga xanuunsan yihiin inay ku noqdaan fasalka dhexdiisa. Sababtaas darteed waa inaad markasta dugsiga siisaa faahfaahinta xiriirkaaga saxdaa.

### Marka guriga la joogo

Ka daa ilmahaaga dugsiga una gee in dhaqtar arko haddii uu ilmahaagu:

- qabo xumad gaarsiisan 38°C ama ka kor
- matagayo ama shubmayo
- qabo calaamadaha hargabka ama fuluuga
- qabo firiiric aan sababta keentay la aqoon.

### Cudurada caadiga ah qaarkood

Ku hay ilmahaaga guriga una raadi talooyin daaweyn si dhakhso ah haddii uu ilmahaagu qabo mid ka mid ah waxyaalaha soo socda:

- **Bus-buska:** xummad yar, biyaha sanko ka dareera iyo firiiric ku bilowda ka dibna noqda nabaro casaan ah kuwaas oo biyo galeen iyo malax yeesha .
- **Daafka:** indhaha oo cuncuna, casaan noqda oo ilmo leh. Xiribaha oo isku dhegdehga marka la seexdo.
- **Findoobka:** baro casaan yaryar ah oo isku baddala nabaro malax ku jhirto ka dibna qolof fuusho – badanaa laga helo wejiga, gacmaha ama basada.
- **Ringworm:** baro yaryar oo maqaarka dushiisa ah oo ku wareegsan yahay wareeg casaan ah.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurada faafa ka wac NSW Health taleefanka (02) 9391 9000 ama ka eeg [www.health.nsw.gov.au](http://www.health.nsw.gov.au)

### Ammaanka Qorraxda

Dugsiyadu waxay ku dadaalaan inay carruurta ka ilaaliyaan waxyeellada ilayska qorraxda ka yimaada ayagoo siiyaa meelo ay ka galaan iyo inay soo qaataan koofiyado oo ka mid ah yunifoomba dugsiga. Koofida ilmahaaga waa in la soo xirtaa marka ay joogaan garoonka cayaartaama haddii kale waa inay ku cayaaraan meel hoos leh. Carruurta waxay kaloo soo xiran karaan muraayadda-hooska intay dugsiga joogaan si indhaha looga ilaaliyo waxyeellada cadceedda.

Guriga inta la joogo, marmari kareemka cadceedda subaxdii ka hor intuuusan dugsiga aadin ilmahaagu taas oo joogto ah.

### Arimaha Caafimaadka

Haddii uu ilmahaagu qabo wax xaalad caafimaad ah, aleerjiko ah, ama uu khatar ugu jiro anaphylaxis ama u baahan yahay in la siiyo daawo loo soo qoray, waa in dugsiga loo sheegaa. Macluumaadkan waxaa badanaa la siiyaa asagoo qayb ka ah habka dugsi-ku-qoridda, si kastaba ha ahaatee, waxaa kaloo muhiim ah inaad u sheegto dugsiga wax kastoo isbaddal ah oo ku dhaca caafimaadka ilmahaaga.

### Aleerjikada

Anaphylaxis waa jiro daran oo ah falcelis aleerjikada ardayga oo uu ka qaado cuntooyinka sida lowsaska ama shellfish ama qaniinyada xasharaadka. Haddii ilmahaaga lagu soo sheegay aleerjikadaas xun oo uu ka qaado cuntada waxaa muhiim ah in hore loogu sii sheego maamulaha dugsiga intii suurtagal ahba si xeeladihii wax looga qaban lahaa loo sii sameeyo kuwaas oo gacan ka gaysanaysa yaraynta la kulmida allergen la yaqaan. Waxaa lagaa codsan karaa inaad maareyaha kaantiinka dugsiga ka caawiso dib-u-eegidda miinuuga kaantiinka tusaale ahaan.

[www.allergyfacts.org.au](http://www.allergyfacts.org.au)



# Macluumaadka Waxtarka leh

NSW Department of Education  
and Training

Taleefanka: (02) 9561 8000  
[www.det.nsw.edu.au](http://www.det.nsw.edu.au)

Macluumaadka Dugsiyada Dadweynaha  
ee NSW

[www.schools.nsw.edu.au](http://www.schools.nsw.edu.au)

Teknolojiyadda ka jirta  
dugsiga ka eeg *Click*

[www.schools.nsw.edu.au/click](http://www.schools.nsw.edu.au/click)

Is-dhaafsiga Wax-baridda iyo barashada  
Teaching and learning exchange (TaLe)

Macluudka la xiriira waxbarashada iyo waxtarka  
dugsiga: Eeg *Parents and Community* ee  
[www.tale.edu.au](http://www.tale.edu.au)

Adeegga Turjumaanka Afka ee Taleefanka:

Taleefanka: 131 450

Board of Studies

[www.boardofstudies.nsw.edu.au/parents](http://www.boardofstudies.nsw.edu.au/parents)

Gaadiidka Ardayda qaada

Taleefanka: 1800 227 774 ama (02) 9891 8900  
[www.transport.nsw.gov.au](http://www.transport.nsw.gov.au)

Talo-bixinta waalidka

[www.raisingchildren.net.au](http://www.raisingchildren.net.au)

Fikradaha qadada dugsiga  
iyo cuntada caafimaadka leh

[www.healthykids.nsw.gov.au](http://www.healthykids.nsw.gov.au)

Kantiinada dugsiyada ee caafimaadka leh

[www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/  
studentwellbeing/schoolcanteen/index.php](http://www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/studentwellbeing/schoolcanteen/index.php)

Qorshaha Daryeelka Ardayga

[www.det.nsw.edu.au/policies/student\\_serv/  
student\\_welfare/stude\\_welf/PD20020052.shtml](http://www.det.nsw.edu.au/policies/student_serv/student_welfare/stude_welf/PD20020052.shtml)

Ka-hortagga Xoogsheegashada

[www.det.nsw.edu.au/antibullying](http://www.det.nsw.edu.au/antibullying)  
[www.bullyingnoway.com.au](http://www.bullyingnoway.com.au)

Wixii macluumaad ah ee La Turjumej ka eeg:

*Anti-bullying*

[https://www.det.nsw.edu.au/  
languagesupport/documents/index\\_a.htm](https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_a.htm)

Baahiyaha Gaarka ah

[www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/  
programs/lrngdifficulty.php](http://www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/programs/lrngdifficulty.php)  
[www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/  
programs/disability.php](http://www.schools.nsw.edu.au/studentsupport/programs/disability.php)

Best Start Kindergarten Assessment

Wixii macluumaad ah ee La Turjumej ka eeg:

*Best Start Kindergarten Assessment*  
[https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/  
documents/index\\_b.htm](https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_b.htm)

Waxbarashada hibada iyo kartida leh

[www.curriculumsupport.education.nsw.gov.au/  
policies/gats/assets/pdf/polsuppparent.pdf](http://www.curriculumsupport.education.nsw.gov.au/policies/gats/assets/pdf/polsuppparent.pdf)

Aleerjikada

[www.allergyfacts.org.au](http://www.allergyfacts.org.au)  
[www.allergyfacts.org.au/PDF/  
AnaphylaxisGuidelinesFinal.pdf](http://www.allergyfacts.org.au/PDF/AnaphylaxisGuidelinesFinal.pdf)  
Wixii macluumaad ah ee La Turjumej ka eeg:  
*Anaphylaxis*  
[https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/  
documents/index\\_a.htm](https://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/documents/index_a.htm)

Cayaaraha iyo madadaalada NSW

[www.dsr.nsw.gov.au](http://www.dsr.nsw.gov.au)

Ururrada Xiriirada walidiinta  
iyo waayeellada

[www.pandc.org.au](http://www.pandc.org.au)

Kooxda La taliyayaasha  
waxbarashada Aboorijanka

<http://www.aecg.nsw.edu.au/>

Canshuur-celinta Waxbarashada

[www.ato.gov.au/individuals/content.asp?doc=  
content/00174278.htm](http://www.ato.gov.au/individuals/content.asp?doc=/content/00174278.htm)

Manfaca Daryeelka Ilmaha

[http://www.centrelink.gov.au/internet/internet.  
nsf/payments/childcare\\_benefit.htm](http://www.centrelink.gov.au/internet/internet.nsf/payments/childcare_benefit.htm)

Caawimaadda iyo Taageerada  
Khadka Ilmaha (Kids Helpline)

Waa adeeg la-talin taleefan oo lacag la'aan iyo  
qarsoodi ah oo loogu talagalay 5- ilaa 25-sano-jirada:

Taleefanka: 1800 551 800  
[www.kidshelpline.com.au](http://www.kidshelpline.com.au)



# Adeegga Turjumaanka Afka ee Taleefanka

Haddaad doonayso macluumaad dheeraad ah fadlan la xiriiir dugsigaaga. Haddaad u baahan tahay turjumaan ku caawiya fadlan ka soo wac Adeegga Turjumaanka Afka ee Taleefanka **131 450** waxaadna codsataa turjumaan luqaddaada ah. Qofka obaraytarka ah ayaa wacaya dugsiga markaasna turjumaanku wuxuu soo galayaa khadka taleefanka si uu kuugu caawiyo wada-hadalka. Waxba lacag lagaaga qaadimaayo adeeggan.

## Macluumaadka Dugsiga ee La Turjumey

Ka raadi macluumaadka dugsiga ee ku turjuman luqadaha badan halkan:

**[www.det.nsw.edu.au/languagesupport/index.htm](http://www.det.nsw.edu.au/languagesupport/index.htm)**

© December 2009

NSW Department of Education and Training

GPO Box 33

Sydney NSW 2001

Australia

T (02) 9561 8000

[www.det.nsw.edu.au](http://www.det.nsw.edu.au)

ISBN 978-1-921084-24-9



The National Education Access Licence for Schools (NEALS)